



Shuruudaha codsigaagii fiisaha Bani Aadanimo ee Australia dibadeeda

Codsigaaga fiisaha Bani-Aadanimo ee Australia dibadeeda marxalad hore ayuu u gudbay. Si hore loogu sii wado codsigaaga, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad soo martid baaritaanka caafimaadka waxaana laga yaabaa in lagaaga baahdo in la qaado macluumaad shakhsi ah oo adiga kuu gaar ah (biometrics).

Xukuumada Australia, oo ay matalyso Wasaarada Arrimaha Gudaha ayaa magacawday sharikada Toll Transport Pty Ltd (Toll) taas oo ah mida qaadatay qandaraaska Caawimaada Safarka, Caafimaadka iyo Adeegyada la Xiriira Barnaamijka Bani Aadanimo ee dibada Australia (Offshore Humanitarian Program).

Maamulaha ay Toll u xilsaartay kiiskaaga ayaa kula soo xiriiri doona si uu kaaga caawimo samaynta ballamada baaritaanka caafimaadkaaga iyo ururinta macluumaadka shakhsiga ah (biometrics).

Haddii aad codsatay mid ka mid ah Heer-hoosaadka fiisooyinka hoos ku xusan ee Bini-aadanimada ee Australia dibadeeda;

- Qaxooti (Xeer-hoosaadka 200)
- Bini-aadanimada gaarka ah ee dalka gudahiisa (Xeer-hoosaadka 201)
- Soo-badbaadinta Degdega ah (Xeer-hoosaadka 203) ama
- Dumarka Khatarta ku sugan (Xeer-hoosaadka 204)

Kharajka baaritaanka caafimaadka, qaadista macluumaadka kuu gaarka ah (biometrics) (haddii loo baahdo), safarka sii socod iyo soo socodka ballanka iyo hoyga haddii uu lagama maarmaan noqdo si aad u tagto ballanka waxaana bixin doonta Wasaarada.

Haddii aad codsatay fiisaha Caalamiga ah ee Gaarka ah ee Bani-Aadan-nimo (Global Special Humanitarian) (kaas oo hoos imanaya 202), Wasaarada ayaa bixinaysa kharashka safarka inaad timaado ballamada Caafimaadka iyo qaadista macluumaadka kuu gaarka ah (biometric), (kharashka qaadista macluumaadka kuu gaarka adaa iska bixinaya ama qofka ku soo magacaabay/kuu xareeyey fiisaha. Haddii loo baahdo inaad samayso baaritaanka DNA, safar kasta, hoyga(transit) iyo qiimaha baaritaanka DNA Wasaaradu ma bixinayso ee waa inaad bixisid adigu ama uu bixiyaa qofka ku soo magacaabay (kuu xareeyey). Kharashka ilaalada

caafimaadka la socda, haddii loo baahan yahay, waa inaad adigu bixisaa ama qofka ku soo magacaabay (qofka kuu xareeyey).

Fadlan, hubi dhamaystirka baaritaan kasta oo la codsaday si hore looga socodsiiyo codsigaaga.